

XOOGAA SHARCIYO FUDUD OO LOOGU TALAGALAY DADKA ROONDEEYA HABEENKII

- Dadka roondeeya habeenkii waligood uma dhaqmayaan sidii mas'uuliyiin, ilaalo, waardiyo iyo wixii la mid ah.
- Waa in aan waligeenna baarin alaabaha shakhsi ahaaneed ama aanan sameynin baaritaanno (tani looma adeegsan karo haddii ay dhaco xaalad degdeg ah, "Sharciga lagu baddelo xaaladda degdegga ah").
- Dadka roondeeya habeenkii waa in aysan waligood iska dhigin inay wakiil u yihiin madaxda ama inay u shaqeynayaan badalkooda.
- Dadka roondeeya habeenkii si rasmi ah uguma khasbana qarsoodi - waajibaadkan waa mid la xiriira xumaanta iyo samaanta. Waxay ku xiran tahay qofka roondeeya / kooxda roondeysa habeenkii in ay go'aamiyaan waxa la sheegayo iyo qofka loo sheegayo. Tixgeli kalsoonida u dhaxeysa dadka da'yarta ah iyo adiga sidii qof roondeeya habeenkii ahaan.
- Dadka roondeeya habeenkii waligood kalama wareegi karaan aalkolo ama maandooreyaasha kale shakhsi kale. Kaliya booliska ayaa xaq u leh in ay tani sameeyaan ayadoo la eegayo sharciga Iswidhen.
- Tani waa run ayadoon la eegaynin da'da qofka.
- U kaxaynta eygaaga roondeynta habeenkii waxaa loo arki karaa in ay tahay hab wanaagsan oo la iskugu darayo fal wanaagsan iyo waqti firaaqo. Waxaan, si kastaba, si aad ah ugu talinaynaa in eeyaha aanan loo kaxaysan roondooyinka habeenkii. Tani waxay argagax gelin kartaa dadka qaarkood, ayadoo sidoo kale ay muhiim tahay in la tixgeliyo kuwa qaba xasaasiyadda iyo waxa lagu sameynayo eyga haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah?



Goormee ayaad dibadda noo raacaysaa?
Mar kasta waxaa sidoo kale jirta jaakeet adiga laguugu talagalay.

SIDA LOO BILLAABAYO

Ma danaynaysaa in aad la xiriirtid kooxda deegaankaaga roondeysa habeenkii ee kuugu dhow? Maad ku fikiraysaa in aad billowdid koox adiga kuu gaar ah kaliyana ma doonaysaa in aad wax badan ogaatid?

Si aad u heshid kooxda deegaankaaga ee roondeysa habeenkii, booqo **www.nattvandring.nu** waxaadna ka raadisaa hoosta "hitta din grupp" (hel kooxdaada).

Waxaad sidoo kale emayl u diri kartaa: **info@nattvandring.nu** si aad u heshid xog faahfaahsan oo dheeraad ah.

Haddii aad danaynaysid in aad billowdid koox deegaanka ah oo roondeysa habeenkii, fadlan kala xiriir ururka nattvandring.nu adigoo u maraya e-maylka: **info@nattvandring.nu** ama wac **+46 8 50 66 55 80** si aad u heshid la talin.

NATTVANDRING
WWW.NATTVANDRING.NU

Stiftelsen nattvandring.nu
c/o Skandia
SE-106 55 Stockholm

09.00-17.00
+46 (0)8-50 66 55 80

info@nattvandring.nu

www.nattvandring.nu

URURKA

# NATTVANDRING.NU



Nattvandring.nu waa urur sama-fal oo ay sameysay shirkadda tamarta E.ON iyo shirkadda caymiska Skandia - waxaana hindisaha lahaa Vera Dordevic iyo Janne Lundholm.

Ururka wuxuu billaabayaa heshiisyo isku-xirnaan oo uu la yeelanayo kooxaha iyo ururrada doonaya in ay taageeraan roondooyinka habeenkii deegaanka laga sameynayo ee Iswidhen oo dhan ah.

Ayadoo yoolka uu yahay  aasaasidda kooxo roondeeya habeenkii oo cusub, nattvandring.nu waxay bixisaa jaakado, caymis, muxaadarooyin, taageero maaddi ah, tababar, iyo wixii la mid ah oo loogu talagalay kooxaha deegaanka, dugsiyada, ururrada ciyaaraha iyo waaliddiinta iyo/ama guddiyada dugsiga.

Ugu-dambayntii, waxaan doonaynaa in ay jiraan dad qaangaar ah ee meel kastoo Iswidhen ah jooga oo ka qaybqaadanaya roondooyinka habeynkii ee laga sameynayo magaalo kasta ama nawaaxi kasta.

## TAARIIKH

2006-dii, waxaa billaabatay shaqo ku saabsan horumarinta fikradda guud ee markii dambe noqotay nattvandring.nu bishii Febraayo 2008-diina, shirkadda E.ON waxay go'aansatey in ay noqoto shiriigga ururka dhaqaalaha ee markaasi la soo jeeday,nattvandring.nu

Sababtoo ah arrinta khusaysa caymiska waxay ahayd arrin muhiim ah, marka waxay noqotay wax caadi ah in la weydiisto Skandia, oo caymin jirtay roondooyinka habeenkii tan iyo 1993. Skandia waxay wax fiican u aragtay habka cusub waxayna sidoo kale go'aansatey in ay shiriig ka noqoto ururka.

Shiriigyada kaddib waxay isku oggolaadeen in Skandia iyo E.ON ay sameeyaan urur qaadanaya aragtida guud, summadda iyo hawlgallada.

## FILASHOOYINKA

Aragtida howlgal aasaasi ah oo fudud, isla markaana xasillan waxay horseedday guul. Muddo aad u gaaban gudaheeda, fikradda waaliddiinta ee ku saabsan roondooyinka habeenkii ah waxay isku badeshay dhaqdhaqaaq  adag oo waddankoo idil ah, laga soo billaabo Haparanda oo ku taalla waqooyiga ilaa Ystad oo ku taalla koonfurta.

## WAA MAXAY ROONDOOYINKA HABEENKII?

Roondooyinka habeenkii ah waxay muujiyaan in aad wax daryeeleysid. Dadka da'yarta ah ee dibadda jooga fiidadka maalmaha fasaxa ee toddobaadka iyo habeenkii waxay badanaa u baahan yihiin in dad qaangaar ay ka ag dhow yihiin. Waxaan joognaa meel kastoo laga yaabo in dadkan da'yarta ah ay joogaan, waxaan ka muuqannaa ama lanaga heli karaa waddooyinka iyo meelaha wareegga ah ee magaalooyinka ku yaalla. Waxaan abuurnaa kalsooni iyo amni anagoo halkaasi u joogno dadka da'yarta ah ee u baahan caawimaadda. Waxaa laga yaabaa in lanaga doonayo in aad dhageysanno, dhex-dhexaadinno, siinno gargaar degdeg ah ama in kaliya aan deeminno taleefoonka gacanta.

Dadka Roondeeya habeenkii waxay  la sameynayaan xiriirro qaangaarnimo macna weyn leh dadka da'yarta ah ee ku sugan xaaladaha kala-duwan. Xataa kuwa sida caadiga ah haysta jawi guri badbaadsan oo raaxo leh waxay mararka qaarkood geli karaan xaalado ay u baahan karaan taageeradaada. Kuwo kale waxaa laga yaabaa in aysan haysan dad qaangaar ah oo ay isku hallayn karaan noolashooda guud ahaanba.

Joogitaanka badan ee qaangaarada waxay caawimaad ka gaysaneysaa ilaalinta dadka da'yarta ah waxayna yareynaysaa xaaladaha rabshadda, kharribaadda, isticmaalidda aalkolo iyo maandooriye.

Dadka roondeeya habeenkii ma aha midkoodna boolis, ilaalo amni ama adeegyada bulshada. Waxaa nahay kaliya dad qaangaar ah oo ku dhiirran in ay u dhaqmaan sidii dad qaangaar ah, kuwaas oo wax daryeelaya, mas'uuliyadna qaadaya.

Haddii aad ka weyn tahay 18, oo aadna danaynaysid dadka da'yarta ah aadna doonaysid in aad noqotid qof lagu daydo, markaasi waxaad noqon  kartaa qof roondeeya habeenkii. Dadka roondeeya habeenkii qaarkood waxaa sidoo kale ka mid ah dad ka yar 18. Waxaa mar kasta la socda qof roondeeye habeenkii oo qaangaar ah khibradna u leh.

**Sidii qof roondeeya habeenkii ahaan, waa muhiim in aad noqotid qof bulshaawi ah oo la maamuli kara; habeen kasta iyo qof kastoo da'yar waa arrin gaar ah.**



## MUXUU QABANAYAA QOFKA ROONDEEYA HABEENKII?

Dadka roondeeya habeenkii waxay aadaan waddooyinka iyo meelaha wareegga ah ee magaalooyinka ku yaalla halkaas oo ay ugu dhexdarsamayaan dadka da'yarta ah, ayagoo siinaya amni. Waxaan xushmaynaa dadka da'yarta ah, waxaa nahay dad lagu daydo oo hubaal ah waxaana mar kasta haysannaa waqti aan ku dhageysanno, kula hadalno, ku wada-hadalno, ku dhexdhexaadinno ama aan ku siinno talo.

Waxaan wada shaqayn la leennahay booliska iyo mas'uuliyiinta kale ayagoon soo faragelinaynin joogitaankeenana waxaa loogu talagalay in lagu kordhiyo ka qaybgalka qaangaarka. Dadka roondeeya habeenkii waxay leeyhiin dhiirranaan ah in ay u dhaqmaan sidii dad qaangaar ah iyo xaddad degsan ayagoon khadka ka gudbaynin.

Roondooyinka waxay ka kooban yihiin kooxo ugu yaraan labo qof ah - kooxo seddax nin ah ayaa lagu taliyay - fiidadkii marka ay joogan dad da'yar ah oo badan. Sida iska cad habeenkii oo dhan ma roondeyno, balse inta saacadood ee aan doonayno ama aan maarayn karno. Roondooyinka habeenkii waxay ku siinayaan jimicsi iyo hawo daray ah, fursad aad kula sameysanaysid xiriirro iyo isku xirnaan qaangaarada kale, in aad la kulantid da'yar badan oo faraxsan  haddana togan iyo in aad ku muujisid in aad danaynaysid.